


Nasteexooyinka Akhris-qoraalka si loo caawiyo ilmahaaga

Ka-hor dugsiga - Sannadka -zaad

Ilmo kasta
ha helo
fursad
kasta



Qoysasku waa samaynta kowaad oo ugu badan xagga koritaanka ilmaha waxayna qayb muhiim ah ka qaadataa waxbarashada ilmaha.

Waxaa jira siyaabo badan aad u horumarin karto aadna u taageeri karto xirfadaha hadalka, dhagaysiga, aqiska iyo qoraalka oo uu ku baranayo asagoo cayaaraya iyo nashaadyada qoyska ee maalin kasta.

Buug-yarahan wuxuu bixinayaa naseexoo yinka kuwaas oo adiga, ama xubnaha qoyska ee kale, aad la samayn karto ilmahaaga nashaadyada maalin kasta si aad u horumariso xirfadahooda akhris-qoraalka.

Waxtar weyn bay u noqon kartaa inaad ilmahaaga ka qaybgeliso nashaadyadan oo kale luqaddooda kowaad, iyo Ingiriisiga haddii aad ku hadli karto.

Qaypta elaktarooniga ee buug-yarahan waxaa lagu heli karaa Ingiriisiga iyo 23 luqaddood oo kala duwan kuwaas oo qoysasku Iskaashato ka yihiin website-ka Wax-baridda: www.education.vic.gov.au/about/directions/familiesaspartners/schools/connecting.htm

Halkee baan caawimaad ka heli karaa?

Na Fa i a Saya

Macalinka ilmahaagu wuxuu talooyin kaa siin karaa sidaad u caawin lahayd xirfadaha akhris-qoraalka ee ilmahaaga. Mowduucyada qaarkood waxaad kala hadli kartaa macalinka kuwaas oo ay ka midka yihiin:

- Heerka wax-qabdarka ilmahaaga ee hgowlaha akhris-qoraalka.
- Hadafyada uu ilmahaagu u shaqaynayo inuu ka gaaro xagga akhris-qoraalka, iyo sida aad u taageeri karto ilmahaaga inuu arimahaas gaaro.
- Keeladaha aad isticmaali karto si aad ilmahaaga u caawiso xagga meelaha ku adag asaga ama ayada.

Qalabyada Intarneedka

Website-ka cusub new Connect-Primary ee Dowladda Victoria ayaa sahla si aad ula xiriirto qalabyada waxbarasho ee kombiyutarkaaga guriga, kombiyutarka maktababadda degaanka, ama dugsigaaga.

Ka eeg Website-ka Connect-Primary website oo ah: <http://www.education.vic.gov.au/primary>

Website-ka Connect-Primary waxaa hubiyey macalimiinta si loo hubiyo inuu ku habboon yahay inay isticmaali karaan carruurtu.

Xusuuso, hadda aad gasho website-yada kale aan ku qornayn Website-ka Connect-Primary, xagga ammaanka darteed, waa inaadan intarneedka ku siin faahfaahinta shaqsigaaga, sida magacaaga ama magaca ilmahaaga oo dhammaystiran, dugsiga, lambarka taleefanka ama ciwaaanka cid kasta oo aadan garanayn.

Ultranet waa nadaam intarneed ah oo cusub kaas oo ku siin kara macluumaadka ku saabsan wax-baridda ilmahaaga ee dugsiga. Waa website dowlad-goboleedka oo dhan ah, ammaan ah kaas oo ardayda oo dhan, waalidiinta iyo macalimiintuba ay ka heli karaan intarneedka. Ka eeg website-ka *Ultranet* oo ah: www.education.vic.gov.au/about/directions/ultranet/benefits/parents.htm

Ka caawinta ilmahaagu inuu wax akhriyo, qoro ama dhageysto

Isticmaalida nashaad maalmeedka si loo sameeyo xiriirto guriga ah



- La wadaag heesaha isku dhawaaqa ah iyo heesahaba kuna dhiirigeli ilmahaagu inuu ku biiro.
- Dhageyso ilmahaagu ugana jawaab fikradahooda su'aalaha leh weydiina macluumaa ka sii badan.
- Tilmaan kana hadal xarfaha iyo erayada idinku hareeraysan. Tusaale, sanduuqyada siriyaalka, lambarada gaadhiga, calaamadaha.
- Wada kariya waxyaalaha sahlan. Akhri cunto sameyninta, ka hadal waxaad sameynaysid.
- Ku biir maktabada alaabta ciyaarta wada doortana alaabta lagu ciyaaro.
- Fiiri warqadaha aan qof gaar ah ku socon ee laguu soo diro kala hadal waxyaalaha iibka ah.
- Ka hadal sawirada qoyska iyo taariikhaha.

Sheeko- sheegida

Sheeko sheegidu waa si weyn oo lagu kordhiyo luuqada ilmahaaga iyo xirfadiisa dhageysiga, iyo sidoo kale furida fekerkooda. Ama adigu sheeg sheekada ama ku dhiirigeli ilmahaagu inuu sheego.

Sheeko- sheegidu waxay ku saabsanaan kartaa:

- Jilaa aad ka hesho oo buug ama barnaamij telefishin.
- Xubin kale oo qoyska ah.
- Alaabta ciyaarta ee ilmahaagu ka helo.



Halkan waxaa ah waxoogaa tallooyin aad ku bilaabi karto sheeko sheegidaada:

- Ka dhig mid lagu farxo, oo leh codadka kala duwan, boombalada wax lagu jilo, props ama ciyaarta farta.
- Ku bilow waxa xiiso gelinaya ilmahaaga.
- Bilow meesha iyo jilaha.

Wax wada akhrinta

Wax akhrantu waa si muhiim ah oo lagu sameeyo xiriirka ka dhaxeeeya erayada lagu hadlo iyo kuwa la qoro.

Wax u akhrinta ilmahaaga waa shay muhiim ah in la sameeyo. Halkan waxaa ah waxoogaa tallooyin ah:

- Ku dhiirigeli ilmahaagu inuu soo xusho buugta, joornaalada billaha ah, kataloogyada, sheekooyinka tignoolajiyada ama DVDs.
- Kala hadal sawirada ku jira buugga kuna dhiirigeli ilmahaagu inuu ka hadlo sawirada.
- Wadaaga buugta sawirada leh ee aan erayada lahayn si aad u koriso fekerka, fikradaha iyo erayada cusub adoo magacaabaya waxyaalaha sawirada ku jira.
- Dib u akhri ilmahaaga buugta iyo sheekooyinka uu ka helo.
- Ku taageer ilmahaaga inay ku sameeyaan buuggaagtooda sawiro ka dibna inay kuu ‘akhriyaan’ sheekada adiga.



La akhrinta ilmahaaga waxay bilaabanaysaa marka ilmahaagu barto sheekada oo uu la wareegi karo qaar ka mid ah akhriska.

Marka ilmahaagu **wax kuu akhriyo**, u ogolow wakhti aad ku ogaatid erayada oo aad su'aalo ku weydiisid si aad u aragtid haddii isaga ama iyadu fahmeen waxay akhriyeen.

Sidoo kale muhiim bay kuu tahay inaad tusto ilmahaaga sidaad maalin walba waxa ugu akhriso ujeedooyin kala duwan. Tusaale ahaan: cunto karinta, kaadhadhka salaanta, jadwalka taariikhda, liiska wax soo gadashada, waxa ku qoran cuntooyinka, awaamiirta, khariiradaha, wargeysyada, iimeylada, calaamadaha, website –yada iwm.



Book talk waa qayb muhiim ah oo ka mid ah akhriska. Ku kaftan wax ku saabsan buugga ka hor, inta lagu jiro ama ka dib akhriskiisa, dhab ahaantiina u dhiirigeli ilmahaaga inuu ka hadlo wax ku saabsan fikradahooda kana weydii su'aalo ku saabsan buugga. Halkan waxaa ah waxoogaa su'aalo ah oo aad weydiin kartid wakhtyo kala duwan oo ka horeeya, inta lagu jiro iyo akhriska buugga ka dib:


- Maxaad jeelaan lahayd inaad wax ka akhriso?
- Ma jeelaan lahayd inaad doorato buug aad jeceshahay?
- Fiiri galka – maxaad u maleynaysaa inuu buuggani ku saabsan yahay?
- Sawirada maxaa ka dhacaya?
- Maxaad u maleynaysaa inay dhaceysa oo ku xiga?
- Maxay tahay qaybtaad ugu jeceshahay buugga?
- Waa’ayo jilaha aad ugu jeceshahay sheekada? Waa maxay sababta aad u jeceshahay jilahaas?
- Haddii aad bedeli lahayd dhammaadka buuggan, sidee buu noqon lahaaa?

Akhrinta fikradaha

- Eeg oo iskuwada daya kedisyada idinkoo gujinaya xiriirka Quiz ee ku yaal website ka FUSE ee loogu talagalay ardeyda dugsiga hoose/dhexe.
- Qor waxa ilmahaagu kaaga sheegayo khibradiisa ka dibna wada akhriya.
- Booqo maktabada xaafadaada ama maktabada dugsiga si aad u xulato oo aad u wada akhrisaan buug.
- Ogaada xaqiqa ku saabsan aduunka idinkoo gujinaya Raadi xiriirka website ka FUSE ee loogu talagalay ardeyda dugsiga hoose/dhexe.



- Sawir ama rinjiyee sawirkka ku saabsan meealaha ama jilayaasha. Guji xiriirka Sawirida ee website ka FUSE ee loogu talaglay ardeyda dugsiga hoose/dhexe.
- Sahami erayo adoo isticmaalaya qaamuuska.
- Ka hadal waxa ay sameeyaan qoraayaasha iyo farshaxanlayaasha.
- Tilmaan waxyaalaha muhiimka ah ee ku saabsan buug-galka hore, inta ugu muhiimsan buuga, bogga tusmada, cinwaanka iwm.




Akhrinta iyo qoridu way wada socdaan

Barashada sida wax loo qoro waxay ka bilaabantaa feegaar iyo sawiraad. Tani waa tallaabadii ugu horeysay oo muhiim ah waana in la dhiirigeliya. Ku taageer ilmahaagu inay u akhriyaan qoraalkooda kor. Abuur meel aad ku keydisid oo aad ku bandhigtid qoraalkooda.

Isticmaal waayo aragnimada ilmahaaga si aad u abuurto xiriir u dhaxeeya hadalka, qoraalka iyo akhriska.

Halkan waxaa ah qaar tallaabooyinka la raacayo:

- Weydii ilmahaaga inuu ka hadlo waayo aragnimadiisa ama wax iyaga xiiso geliya.
- Weydii ilmahaaga qaybta wada sheekaysiga ee ay jeelaan lahaayeen inaad qorto.
- Isla marka ilmahaagu hadlayo qor fikradahooda. Isticmaal ilmaha luuqadiisa.
- Weydii ilmaha inuu dib u akhriyo qoraalka.
- Waxaa laga yaabaa inuu doono inuu sawiro masawir ama abuuro wax u dhigma qoraalka.



Fursadaha aad wax ugu qori karto maalin walba guriga:

Jeclow akhriska, qoraalku wuxuu noqonayaa nashaadka maalin kasta ee guriga. Ha ku arko ilmahaagu adoo wax qoraya.

Ku day guriga fikradahaan qoraalka:

- Qor liiska wax soo gadashada ama ku dar alaab liiska saxnaalaabta aad soo iibiso ama aad furfurto.
- Yeelo looxad aad wax ku qorto oo aad ka akhriso fariimaha qoyska.
- Qorshee wada qorana qoraalka cuntada toddobaadka.
- Qor qaybo loogu talagalay sawirada qoyska ee albamka sawirada.
- Ku qor magacyo shaqada farshaxanka ee ilmahaaga iyo hal abuurkiisa.
- Samee oo qor kaadhadhka salaanta, kaadhadhka dhalashada iyo qoraalada u mahadcelinta.
- Ku xafid jadwalka taariikhda ee qoyska meel muuqata qorna dhacooyinka qoyska. Kala hadal dhacooyinka soo socda ilmahaaga, tusaale, xaggee, goorma, iyo yaa halkaas joogi doona.



Loolanka Akhriska Premier ka

Loolanka Akhriska ee Premierka waa si weyn oo ay ardeyda Victoria ku hagaajin karaan akhriskooda. Ardeyda waxaa lagu dhiirigelinaya inay akhriyaan ama arkaan 30 buug si ay u gaaraan meel la higanayo. Haddii ilmahaaga hadda baranayo wax akhriska, waxaad ka caawin kartaa inay 'arkaan buug' iyadoo loo akhrinayo ama lala akhrinayo iyo iyadoo laga hadlayo sheekada, erayada iyo sawirada

<http://www.education.vic.gov.au/prc/default.htm>